ELIDEL®

kareem pimecrolimus-ka oo aan isteeroodh lahayn 1%

MACLUUMAADKA BUKAANKA

# Bukaanada loo qoray Elidel® si looga daaweeyo cuncunka maqaarka

# Ku daaweeynta cuncunka maqaarka daawada Elidel

Waxaa laguu qoray daawada  Elidel si lagaaga daaweeyo cudurka cuncunka maqaarka. Buug-yarahaan waxa uu ku siinayaa macluumaad ku saabsan sida la iskugu daweeyo Elidel iyo waxa la sameeyo si loogu yareeyo cambaartaada si degdeg ah oo sida ugu fiican looga hortago cambaar cusub.

# Atopic dermatitis (Cuncunka maqaarka) – waa maxay?

- Atopic dermatitis (cuncunka maqaarka) waxaa sidoo kale loo yaqaannaa cambaarta xasaasiyadeed. Waa cudur maqaarka ku dhaca oo maqaarka barara kaas oo soo noqnoqda kaasoo sababa in maqaarku uu cuncuna, qalala oo dillaaca.

- Cuncunka maqaarka wuxuu ku dhacaa dadka da' kasta leh, laakiin wuxuu ku badan yahay carruurta. Iswiidhan ayaa ah dalka ugu badan ee cudurka Cuncunka maqaarka ku dhaca ku badan yahay.


- Cuncunka maqaarka badanaa dadka ayuu ku dhacaa wuuna baxaa, oo leh waqtiyo uu ka daraayo oo waqtiyada qaarna soo roonaado xaaladaha daran, astaamuhu waxay ahaan karaan kuwo sii dhaqso ah ku faafa.

- Dadka qaarkiis waxay leeyihiin goobo yaryar oo maqaar qallalan ah, laakiin qaar kale waxa laga yaabaa inay la kulmaan maqaar bararsan oo jidhkooda oo dhan ah.

- Sababta saxda ah ee keenta cuncunka maqaarka wali ma cadda, laakiin dhaxalka, habka difaaca jirka oo aad u firfircoonaada iyo arrimaha deegaanka ayaa kordhin kara halista inuu ku dhaco cudurkan.

- Cuncunka maqaarka ma aha mid la kala qaado.

# Cambaarta xasaasiyada waxay u qaybsantaa qaybo kala duwan iyadoo loo eegayo da'da iyo darnaanta



# Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato ka hor intaadan isticmaalin kareemka Elidel

Kareemka Elidel waa in loo isticmaalo oo kaliya cambaarta xasaasiyada. Ha u isticmaalin xaaladaha ama xanuunada kale ee ku dhaca maqaarka.

Kareemka waa in aan la marinin meelaha maqaarka ka mid ah ee uu saameeyay caabuqa fayraska ee socda, sida nabarada qandhada (Fayraska Herpes-ka) ama busbuska. La tasho dhakhtarkaaga ka hor intaadan isticmaalin Elidel haddii aad qabto caabuq maqaarka ee socda.

Elidel waxa laga yaabaa inuu keeno falcelin maqaarka ah oo yar oo ku meel gaadh ah halka kareemka la mariyey, sida dareen diiran iyo/ama kuleel. Haddii ay dhacdo falcelin daran, waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga.

Maqaarka la daweeyay waa in aan lagu daboolin faashado ama dhaymo.

Iska ilaali iftiinka qoraxda, nalalka macmalka ah iyo sariiraha qorraxda marka aad isku daaweeynayso Elidel. Yaree wakhtiga aad ku qaadato qorraxda marka aad dibadda joogto. Xiro dhar dabacsan oo isticmaal dacdeeda qorraxda saxda ah si aad maqaarkaaga u ilaaliso.

Elidel waa in aan isku mar la isticmaalin daaweynta iftiinka ultraviolet-ka  (tusaale UVA, PUVA, UVB) ama inta lagu jiro daawaynta daawooyinka difaaca jirka (sida azathioprine ama cyclosporine).

Xaaladaha aadka u daran ee cambaarta xasaasiyada, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad joojiso isticmaalka daawada Elidel ka hor tallaalka. La tasho dhakhtarkaaga si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah.

Haddii fal-celinta maqaarku ay keento natiijada tallaalka, waxaa lagu talinayaa in la sugo si aad Elidel u mariso maqaarka goobta la duray ilaa fal-celinta ay hoos u dhacdo.

Haddii aad uur leedahay ama aad naaska nuujinayso, rumayso inaad uur yeelan karto, ama aad qorshaynayso inaad ilmo dhasho, weydii wixi xog ah dhakhtarkaaga ama farmashiistahaaga ka hor intaadan isticmaalin daawada Elidel.

Elidel waa in aan la isticmaalin xilliga uurka waana in aan la marsiin naaska marka naaska la nuujinayo.

Isticmaalka daawada Elidel carruurta ka yar 3 bilood laguma talinayo.

Had iyo jeer u isticmaal dawadan sida uu dhakhtarkaagu ku farayo.



# Sida loo isticmaalo Elidel

Elidel waxaa loo isticmaali karaa dhammaan maqaarka qaybtiisa kore, oo ay ku jiraan madaxa, wejiga, qoorta iyo laalaabka maqaarka.

**Sida kareemka loo marsado:**

- Dhaq oo qalaji gacmahaaga.
- Ku tuuji kareemka fartaada.
- Marso lakab khafiif ah oo Elidel ah oo keliya meelaha maqaarka leh ee canbaarta leh si meeshani ay u noqoto mid gebi ahaanba ay dabooshay daawada.
- Si tartiib ah ugu mari kareemka Elidel si buuxdo.

Elidel waa in la isticmaalo laba jeer maalintii, tusaale ahaan hal mar subaxdii iyo hal mar fiidkii.

Waxaad si wadajir ah u isticmaali kartaa kareemka emollient iyo Elidel. Haddii aad isticmaasho emollients, waxaad si toos ah u marsani kartaa Elidel ka dib.

Ha qubeeysanin, qubays isqawoojis ha samaynin, hana dabaalin isla markiiba ka dib markaad isticmaasho Elidel, madaama uu kareemka ka dhaqmi karo.

Daaweynta muddada dheer ee cambaarta xasaasiyada, Elidel waa in isla markiiba la isticmaalaa marka cuncun ama jidhka casaan noqdo. Tani waxay ka hortagtaa cambaarta inay soo baxdo waxayna siisaa kontorool waqti dheer oo wanaagsan oo lagu xakameeynaayo cambaarta.

Waa inaad dib u bilowdo daawaynta haddii cadeemaha iyo calaamadaha cambaartu soo noqdaan.

Had iyo jeer u isticmaal dawadan sida uu dhakhtarkaagu ku farayo.



# Maxaan samayn karaa shakhsi ahaan?

**Si joogta ah u qooy**
Marso emollient, sida kareemka maqaarka, si joogto ah oo xor ah. Waxay bogsiisaa cuncunka. Waxa kale oo ay ka caawisaa maqaarku inuu ilaaliyo difaaciisa dabiiciga ah, tusaale ahaan, xooqitaanka, kiimikooyinka iyo biyaha.

Qoy sidoo kale xilliyada aadan wax dhibaato ah qabin oo aad xanuun dareemaynin. Tani waxay kuu ogolaaneysaa inaad hesho muddo dheeraad oo aad wax xanuun ah ama dhib ah aad dareemaynin inta u dhaxaysa noocyada cambaarta.

**Ka ilaali maqaarkaaga inuu engego**
Mar kasta oo uu maqaarkaagu taabto biyaha, waxaa uu sii noqdaa mid qallalan. Biyaha kulul ayaa maqaarka ka engejiya in ka badan inta aay engejiyaan biyaha qabow.

- Qubayska isqawoojiska ha samaynin oo ha qubeeysanin maalin kasta ilaa aad u baahato mooyee.
- Cambaartaada si aan loo baahnayn ha ku dhaqin saabuun iyo biyo. Isticmaal saabuun yar oo aan caraf badan lahayn.
- Ku qoy maqaarkaaga kareemka emollient ah ka dib qubaysiga isqawoojiska iyo qubayska, sababtoo ah maqaarku haddii kale si fudud ayuu u engeegaa.

Isha xogta: www.1177.se

**Naftaada ka ilaali walxaha dhibaatooyinka keeni kara**

Waa kuwan waxaad samayn karto si aad naftaada uga ilaaliso walxaha dhibaatooyinka keeni kara:

- Isticmaal saabuunta aan udgoonka lahayn kana fogow kuwa waxa jilciya. Ha isticmaalin saabuun ka badan intii loo baahnaa.
- Dhaq dharka cusub ka hor intaadan xidhan si aad uga takhalusto wixii kiimiko ah.
- Ka fogow walxaha kicin kara cambaartaada, sida dareeraha la isku dhaqo ama dahabka ka kooban
- nikkel-ka.
- Xidho galoofyada balaastikada ah marka aad maydhayso suxuunta haddi ay canbaar ka hayso gacmahaaga.
- Iska ilaali biyaha leh koloriinka.

**Ha ku heynin gurigaaga heerkul aad u kulul oo iska ilaali boodhka**

Waa kuwan sida aad u saameyn karto deegaankaaga gudaha si aad u yareyso calaamadahaaga:

- Hubi in aanay gudaha aad kulayl u ahayn. Hawadu way sii engegi doontaa marka uu gurigaagu kululaado. Hawada qalalan ayaa ka sii dhigi karta dhibaatooyinkan kuwa daran.
- Qolka jiifkaagu ha ahaado qaboow oo isku day inaad isticmaasho maro khafiif ah.
- Ka fogow meelaha boodhka leh.



Isha xogta: www.1177.se Illustration: Pontus Andersson

**Xiro dhar lagu neefsan karo**
Maqaarkaagu aad ayuu kuu cuncuni karaa haddii aad dhidido. Sidaa darteed, waa fikrad wanaagsan inaadan xiranin dhar ku kululayni kara. Ka fogow dharka macmalka ah ee aan hawada fiican aay kaso gali karin. Sidoo kale iska ilaali dharka ka samaysan dhogorta. Waxay ka xasasiyayni kartaa maqaarka. Maqaarkaaga waxaa uu ku fayoow qabi markad xiran tahay dharka hawada leh. Dooro sheeyaasha sida suufka, bamboo ama xariirta.

**Qorraxda si taxadar leh u qaado**
Cambaarta waxaa inta badan nafisiyaa iftiinka qorraxda, laakiin maqaarka qaba cambaarta ayaa si gaar ah xasaasi u ah. Sidaa darteed, si taxadar leh u qorraxayso oo iska ilaali in aad gubto naftaada

Carruurta da’doodu ka yar tahay hal sano waa inay gebi ahaanba iska ilaaliyaan qorraxda, carruurta waaweynna waa in laga ilaaliyaa qorraxda si looga ilaaliyo gubashada.

**Iska ilaali inaad xoqdo maqaarkaaga**
Way adkaan kartaa in aan la xoqin. Laakiin xoqiddu waxay sababtaa cuncun badan. Waxa kale oo ay kordhisaa halista infekshanka canbaarta, markaa waa muhiim inaad isku daydo inaadan xoqin.

Waa kuwan waxa aad samayn karto si aad isaga ilaaliso xoqitaanka maqaarkaaga:

- Cidiyahaaga ha ahadaan kuwo jaran oo gaaban.
- Si tartiib ah ugu salaax ama ku duug kareemka maqaarka halkii aad ku xooqi lahayd cidiyahaaga marka ay ku cuncunayso.
- Xidho galoofyada suufka ah markaad seexanayso si aadan canbaartaada u xoqin xilliga aad hurdeeyso.



Isha xogta: www.1177.se

# Xusuus-qorka daawaynta

**Talooyinka:** Way fududahay in la xasuusto in la qooyo haddii aad hayso xusuus-qor daawaynta ah oo diyaarsan.

Buuxi taariikhda marka aad bilowdo daaweynta. Sax meesha calaamadda mar kasta oo aad kareemka marsato.

**Bilawga daawaynta, taariikhda:** ......................................

| Maalinta | Isniin | Talaado | Arbaca | Khamiis | Jimca | Sabti | Axad |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Marinta subixi | | | | | | | |
| Marinta fiidkii | | | | | | | |

| Maalinta | Isniin | Talaado | Arbaca | Khamiis | Jimca | Sabti | Axad |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Marinta subixi | | | | | | | |
| Marinta fiidkii | | | | | | | |


| Maalinta | Isniin | Talaado | Arbaca | Khamiis | Jimca | Sabti | Axad |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Marinta subixi | | | | | | | |
| Marinta fiidkii | | | | | | | |

| Maalinta | Isniin | Talaado | Arbaca | Khamiis | Jimca | Sabti | Axad |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Marinta subixi | | | | | | | |
| Marinta fiidkii | | | | | | | |

# La soco canbaartaada

Calaamadee meelaha maqaarka ka soo baxda cudurka cuncunka maqaarka ee sida caadiga ah ka soo baxa. Calaamadaynta meelahan waxay sahlaysaa in la ogaado halka lagu daweynayo Elidel si looga hortago faafitaanka.

Sawirku wuxuu kaa caawin doonaa inaad la socoto sida wanaagsan ee daaweyntu u shaqeynayso. Ha iloobin inaad calaamadeyso so baxa meelaha maqaarka cusub.



ELIDEL®

kareem pimecrolimus-ka oo aan isteeroodh lahayn 1%




SE-ELI-2024-00018-SEPT

## Fadlan booqo webseytkeena: www.hudguiden.se

**Elidet®** (pimecrolimus) waa dawo dhakhtar qoray oo loo isticmaalo in lagu daweeyo calaamadaha cambaarta xasaasiyada ee fudud ama dhexdhexaad ah ee dadka waaweyn iyo carruurta da’doodu tahay 3 bilood iyo ka weyn. Waxay keeni kartaa falcelin khafiif ah oo muddo gaaban ah, sida dareen diirran iyo/ama gubasho, aagga maqaarka la daweeyay laga dareemo. Haddii habka difaacaaga uu dhaciif yahay sabab kasta oo jirtaba ha keentee, la hadal dhakhtarkaaga kahor intaadan isticmaalin Elidel. Kareemka waa inaan lagu isticmaalin meelaha maqaarka uu saameeyay caabuqa fayras ee socda, sida nabarada qandhada (Fayraska Herpes-ka) ama busbuska. Haddii ainfekshan maqaarka ah jiro, la tasho dhakhtar ka hor isticmaalka. Ka ilaali maqaarkaaga kulaylka UV-ga adiga oo qaadaya tillaabooyinka ilaalinta qorraxda ee habboon kana foganaayo iftiinka qoraxda, nalalka macmalka ah iyo sariiraha qorraxda ee xoogga leh ee daran. Haddii aad uur leedahay ama aad naaska nuujinayso, aad rumaysan tahay inaad uur leedahay, ama aad qorshaynayso inaad ilmo dhasho, la tasho dhakhtarkaaga ka hor inta aanad isticmaalin dawadan. Ma aha in la isticmaalo xilliga uurka. Ha marinin naasaha marka aad naaska nuujinayso. **Si taxadar leh u akhri xaashida Buug-yarahaan ka hor intaanad isticmaalin.**

©2023 Viatris AB. Tel.: 08-630 19 00

VIATRIS